






Shuruudaha Talaalka Dugsiga: Xanaanada Caruurta ilaa Fasalka Shanaad




Talaalada ayaa looga baahan yahay ardayda Wisconsin.* Waxaad ka heleysaa nuqul Duwaanka Talaalka Ardayga dugsigaaga ama waxaad kasoo dejisataa nuqul: <https://www.dhs.wisconsin.gov/library/F-04020L.htm>. Bilawga sanad dugsiyeedka cusub, waxaad bixisaa Duwaanka Talaalka Ardayga dugsiga

Sidee ayaan u buuxin buuxin karaa Duwaanka Talaalka Ardaygayga?

-  La hadal dhakhtarkaaga ama waaxda caafimaadka deegaanka oo waxaad **samaysaa booqasho talaal** xoraanta xagaaga.
-  Waxaad ka dalbataa dhakhtarkaaga **inuu buuxiyo** Duwaanka Talaalka Ardayga oo uu kadibna **saxeexo**
-  **Waxaad siisaa** Duwaanka Talaalka Ardayga dugsiga bilawga sanad dugsiyeedka cusub.
-  **Lahadal** xafiiska dhakhtarkaaga ama waaxda deegaanka caafimaadka hadii **u baahato kaalmo** ama macluumaad dheeraad **ah**.

 Waxaad kala socon kartaa oo aad ka daabacan kartaa talaalka ardaygaaga duwaankiisa Duwaanka Talaalka Wisconsin: <https://www.dhs.wisconsin.gov/immunization/wir.htm>

Talaal nooc ah iyo xadi intee le'eg ayuu ardaygaygu u baahan yahay?

 Dhakhtarkaaga waxa uu ku talin doonaa talaalka dheeraadka ah ee si loo sugo caafimaadka ilmahaaga.

- 4 Polio**
- 4 DTaP/DTP/DT/TD**
- 3 Joonista B**
- 2 Varicella**
- 2 MMR**

*Shuruudaha talaalka waxaa looga tanaasuli karaa sababo caafimaad, diin ama shakhsi ahaaneed.

